



Tetralogy of Fallot

Cillad Saameyneysa Dhiigga Wadnaha Dhexmaraya



Wadne Caadi ah



Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

Cillad Saameyneysa Dhiigga Wadnaha Dhexmaraya ama TOF Tetralogy of Fallot (TOF)

Wadnaha caadiga ah, wuxuu leeyahay laba qalbacyo kore iyo laba hoose. Dhiigga ka soo noqdaa superior vena cava (halbowlaha dhuunta weyn ama SVC) iyo inferior vena cava (halbowlaha dhuunta yar ama IVC) wuxuu aadaa qalbacyada kore oo wuxuu soo maraa daboolka qalbaca midig hoose. Halbowlaha ayaa isku dhegaya oo dhiigga ayaa ka soo baxaya daboolka sambabka isagoo soo maraya halbowleyaasha sambabbada oo wuxuu ka soo baxayaa dhiigga oo ogsijiin wata. Dhiiggu wuxuu ka soo noqonayaa xididdada sambabka isagoo maraya qalbaca bidixda kore. Ka dib ayuu ka soo baxayaa qalbaca bidix sare oo sii maraa daboolka qalbaca bidix hoose. Qalbaca bidix hoose ayaa isku dhegaya, oo dhiigga ayaa uga sii gudbaya halbowlaha dhuunta weyn oo wuxuu ka sii aadayaa jirka intiisa kale.

Sida loo sharxi karo xanuunka Tetralogy of Fallot (Cillad Saameyneysa Dhiigga Wadnaha Dhexmaraya ama TOF) waxaa ka mid ah afar cilladood oo ah wadnaha: halbowlaha weyn oo ka sarreeya, right ventricular hypertrophy (unugweynaad ku dhaca qalbaca midige ama RVH), xuubka ka ag dhow oo weynaada ventricular septal defect (duleelka darbiga wadnaha ama VSD), iyo right ventricular outflow tract obstruction (xannibaadda dhiigga ka baxaya qalbaca midig hoose ama RVOTO). Sida hadda loo sharxo, keliya RVOTO iyo VSD weyn ayaa lagu ogaan karaa xanuunka TOF. RVH waxaa sabab u ah VSD weyn iyo RVOTO ka sarreysa halbowlaha weyn oo kala duwan. RVOTO waxay badan tahay qaab ah dhuubnaanta dubladda (45%). Isku darka qaabka dhuubnaanta dubladda iyo daboolka sambabka ayaa la arkaa 30% inta badan. Kiisaska ugu daran ee TOF, isku dheggenaanta sambabka waxaa la arkaa (10%). Dhuubnaanta (ciriiriga) halbowleyaasha sambabka waa caadi oo qeybta halbowlaha midig ayaa la arkayaa (25%).

Ciladda qalbacyada kore iyo hoose oo dhammaystiran waxaa lagu arkaa 2% carruurta qabta TOF, inta badanna kuwa qaba xanuun ah Kala dhimanaan. TOF waxay ku dhacdaa 10 ilaa 14% carruurta qabta cilladaha wadnaha ee lagu dhasho oo waa cilladda ugu badan ee midab doorsooma.

Wiisiteynta/Calaamadaha Jirka:

- Guuxa wadnaha in uu jiro. Guux heerar ah III ilaa VI ayaa laga maqlayaa dhiigga kore ee xuduudka dhexda bidix ee xabadka. Mar kasta oo uu RVOTO aad u daran yahay, guuxa ayaa sii jilicaya oo sii gaabinayaa.
- Dhiigga sare ayaa soo gaari kara xadka dhexe ee xuduudda bidix (50%).
- Midab doorsoomay marka ilmuhu dhasho ama dhallaanimada hore waa wax caadi ah. Midab doorsoomay oo daran ayaa lagu arkayaa dhallaanka qaba sambabka dhuubta.
- Carruurta naqasku ku yar yahay, neefsashada ayaa ku adkaata oo xoog u soo saaraan ama marmar ayey ku dhageysaa ("marmar" qabasho) ayaa dhacaysa.
- Guduud khafiifa ("casaan") ah TOF ayaa ku dhacda ilmaha uu si weyn uga xirmo qalbaca bidix ilaa midig. Carruurtaan calaamad la'aan ayey noqon karaan ama waxay yeelan karaan calaamad ah congestive heart failure (wadne dhiigga soo saari waaya ama CHF).

Cilladsheegid:

- Raajo Xabadka: Cabbirka wadnaha in caadi yahay. Calaamadaha xididdada sambabada ayaa badanaa yaraada; wuu ka maqan yahay dhallaanka qaba sambabka xirmaa. Wadnuhu in uu badanaa u muuqdo "qaabka buudka" oo ay ugu wacan tahay halbowlaha golxanta sambabka ee ugu weyn oo qeybta iyo kala-foorarka figta sare.
- EKG: RVH in ay badanaa maqan tahay. Leexashada dhidibka midig ayaa laga yaabaa in ay ku jirto dhallaanka qaba midab doorsoon ah TOF, oo leh dhidib ah QRS caadiya ee dhallaanka aan lahayn midab doorsooma ee TOF.
- Uultarasawanka: Si loogu ogaado TOF iyo heerkeeda daran.

Maareynta/Daaweynta Caafimaadka:

- Ka-hortegid ah infakshanka muruqa wadnaha ee nadaafadda ilkaha ayaa muhiim ah.
- Aqoonsiga iyo daaweynta ogsijiinta marmar yaraanaysa si ay ugu caawiso dhallaanka/ilmaha in ay kadaloobsadaan, ogsijiinta in la siiyo, iyo suuxin marka loo baahdo. Marmarka xanuunku soo boodayo waxaa xal u ah qalliin.
- Wakhtiga iyo doorashada qalliinka waxaa lagu saleynayaa calaamadaha, qaabka jir ahaaneed ee gaarka ah, iyo culeyska dhallaanka/ilmaha (eeg hagaajinta TOF). Dhakhtarka wadnaha ee ilmaha ayaa waalidka kala hadli doona.

Tetralogy ntawm Fallot Tetralogy of Fallot (TOF)

- Takhasuska wadnaha in ilmuhu la socdo 6 ilaa 12 bilood markiiba ayaa lagula talinayaa.

Natiijooyinka Mustaqbalka-Fog:

- Garaac wadne oo aan caadi ahayn oo ah goor dambe sida garaac qalbac degdega ayaa jiri karta.
- Carruurta qabta TOF aan dhib lahayn, dhimashadu waa 2 ilaa 3% noloshooda 2da sano ee ugu horreysa.
- Koriinka iyo koboca carruurta qabta TOF waa kala duwan yihiin oo wuxuu saameeyaa cilladaha wadnaha ee dheeraadka ah ee lagu dhasho, cilladaha la xiriira iyo xanuunada kale ee jiri kara.